

Mashruuca horumarinta nabadgelyada Park iyo Porland

Wajiga 2 soo koobista ka qeyb gelinta | Febraayo - Maajo (May) 2025

Degmada Hennepin waxa ay qorsheyneysaa horumarinta nabadgelyada Wadada Park 33) iyo Portland (County Road 35) inta u dhaxeysa I94 iyo Wadada 46aad (county Road 46). Ka qeyb gelinta dadweynaha ee horumarinta Amaanka Wadooyinka Park iyo Portland oo si wanaagsan loo wargeliyo , talo geliyo, qeyb geliyo, oo uga talo bixiyaan deganayaasha iyo ka qeyb galayaasha inta ka qeyb qaadaneysa fikradda naqshadeynta ee la doorto.

Wajiga 1 ee ka qeybgelinta waa mid xoogga saareysa ururinta ra'yiga iyo habka dadku doonayaan in mashruuca loo fuliyo. Wajiga 2 ee ka qeyb gelinta waa mid xoogga saaraya ururinta ra'yiga ee naqshadda horudhaca ah.



Sidee ayaa dadka lagu gaarsiin karaa

Wajiga 2 ee ka qeyb gelinta waa mid xoogga saaraya ururinta ra'yiga iyadaoo la raacayo hababka soo socda:

Kulanka Dadaweynaha U Furan

Khumiistii, 13ka Febraayo intii u dhaxeysay 5 galabnimo ilaa 7dii fiidnimo ee Park Ave Methodist Church lagu qabtay kulan dadweynaha u furan si loola wadaago naqshadda lagu talinayo iyo ururinta ra'tyiga dadweynaha. In ka badan 65 qof ayaa ka qeyb qaatay kulanka iyada oo shaqaalaha mashruuc ay soo gaareen wax kabadan 20 ra'yi oo qoraal ah, yo in ka badan 90 faalo ee naqshadda lagu talinayo.

Faalada naqshadda

Waxaa kale oo barta internetka lagu soo bandhigay naqshad wax laga bedbedli karo si dadweynuhu ra'yigooda uga dhiibtaan naqshadda horudhaca ah ooqofku tilmaamayo mnaqshadda kuna dhaafaya faalo. Mudadii khariidada la soo bandhigay ee 12 Maarso ilaa 2 Juun, wax ka badan 270 faalo ayaa na soo gaaray.

Kulamada dadweynaha u furan ee Mas'uuliyiinta

Shaqaalaha mashruuca waxaa caawiyey Mas'uulka Angela Conley oo marti gelisay kulan dadweynaha u furan oo lagu qabtay Social Services ee Minnesota Maajo 28 laga bilaabo 5:30 galabnimo ilaa 7 fiidnimo. Kulankaas waxaa xoogga la saaray arrimaha la xiriira horumarinta mashruuca iyada oo la sii ururiyey ra'yiga dadweynaha. in ka badan 20 qof ayaa ka soo qeyb galay shaqaalaha mashruucana waxaa soo gaaray ra'yiga afar faalo oo qoraal ah iyo qiyaastii 90 faalo oo ku saabsan naqshadda.

Kulamada goobaha kala duwan

Shaqaalaha mashruucu waxa ay qabteen 9 kulamo wadooyinka lagu qabtay oo looga hadlay shaqaalaha mashruucu kula xiriireen bulsho gaareysa 388 qof. Goobaha lagu qabtay waxaa ka mid ahaa:



Midtown Global Market
Maarso 14

Peace House Community
Maarso 21

Ebenezer Apartments
Abriil 1

Green Central Elementary School Pick
Abriil 9

Metro Transit stop
Abriil 16

Midtown Greenway
Abriil 26

Minnehaha Duck Race
Maajo 3

Green Central Elementary Spring Fling
Maajo 9

Phelps Field Park
Maajo 12



Sidee ayaan ku soo ururinay ra'yiga dadweynaha

Ka qeyb galayaasha waxaa la siiyey fursad ay ra'yigooda kaga dhiiban karaan mashruuca iyo naqshadda horudhaca ah hababka soo socda:



Khariidad a lagu soo



Kaararka ra'vi



Ra'vi dhiibashad



Ra'vi dhiibasho afka looga



limevl



Waxyaabaha aad nala wadaagteen

Boqolaal ra'yi ayaa laga dhiibtay naqshadda iyada oo kaararka ra'yi dhiibashada la soo diray wajigan. Afarta qodob ee ugu waaweyn ee laga hadlay waa:



Kaabayaasha dhaqaalaha ee Bushkuleetiyada iyo dadka lugeynaya

Taageero u muujiyeen:

- ilaalin dheeraad ah oo bushkuleetiga la siiyo, oo dadka qaarkood codsadeen khad sareeya oo kala qeybiya
- horumarinta amaanka dadka lugeynaya, iyaga oo yiri waxa ay fudueyneysaa in dadku ka talaabaan wadooyinka Park iyo Portland
- Lagu kordhiyo calaamad digniin ah marka bushkuleetiyo soo gaaraan isgoysyada

Dadka qaar ayaa dareen ka muujiyey naqshadda la soo jeediyey ee isku dhafka bushkuleetiyada iyo dadka lugta ah ee isgoysyada halka qorshuhu yahay in la baarioyo waddo lugeedka.

**SPEED
LIMIT
30**

Amaanka wadooyinka iyo yareynta xawaaraha

Talo soo jeedin ku saabsan yareynta xawaaraha gaadiidka oo ay ka midyihiin:

- yareynta xawaaraha ee goobaha degaanka ah
- khadka oo xiriir laga dhigo
- sharciga oo aad loo dhaqan geliyo
- waddo lugeedka oo la balariyo

Dadka qaar ayaa dareen ka muujiyey yareynta khadka gaadiidka.



Goobaha gaadiidka la dhigto

Dadka qaar ayaa dareen ka muujiyey:

- Helitaanka goobaha gaadiidka la dhigto oo sii yaraanaya
- nabadgelyada dadka ka talaabaya goobaha gaadiidka la dhigto ee dhinaca gaadiidka ama bushkuleetiyada
- isku xiranka gaadiidka oo ka dhasha goobaha gaadiidka la dhigto, gaar ahaan goobaha ay qoysasku degan yihiin.

Dadka qaar aad bay uga mahad celiyeen saameynta ay talo soo jeedintan ku yeelaneyso goobaha gaadiidka la dhigto iyaga oo fahamsan in mashruucan uu dadka xoogga saaray halkii uu gaadiidka kaliya xoogga saari lahaa.



Tixgelinta Bulshada iyo Lahaashaha

Dadka qaar ayaa dareenka muujiyey in mashruuca loogu talo galay dadka mara wadooyinka ee aysan aheyn mid ay ka faa'iideysanayaan dadka degan agagaarka mashruuca. Dadka qaar ayaa ku farxay horumarinta la soo jeediyey oo dareensan in ay saameyn wanaagsan ku yeelaneyso bulshada ku nool agagaarka mashruuca.

La soo xiriir shaqaalaha mashruuca



Olagoke Afolabi, *Mmaamulaha Mashruuca*
Degmada Hennepin



olagoke.afolabi@hennepin.us



Hennepin.us/park-portland

